

Digniinta dawanka

Marka uu dhaco shil ama masiibo wayn oo khatar ku ah baniaadmiga ama dhismayaasha, waxa suurta gal ah in khatartaa looga digo dadka ku nool Denmark iyada oo la isticmaalayo habka dawanka digniinta elaktaroonika qaranka

Habka digniinta dawanada

Beredskabsstyrelsen ayaa ka shaqeeya maamulana habka diiniinta dawanada

Habku waxa uu leeyahay 1,078 dawan oo ku saameeya 80% degaanada la deganyahey ee dalka Denmark. Hab gooniya ayaa jira oo shidaalkiisu aanu jo'ayn oo dawanku uu shaqeynayo xataa hadii korontada caadiga ihi ay istaagto

Dawanadu waxa ay ku xidhanyihiin dhismoyaal ama tiirarka magaaloyinka iyo miyigaba inta 1000 qof ka badani ay daganyihiin. Puliisku waxa ay isticmaalikaraan dawanno la qaadi karo

Digniinta buliiska

Hadii dhibaato wayn ama masiibo ay dhacdo biliisku way isticmaalikaraan dawanada. Taaso waxa ay fariin u diri karataa DR (habka warbaahinta Denmark) IYO TV2.

Buliiska ayaa bilaabaya dawanada. Waxa ay u digi karaan dadka dalka ku nool oo dhan mar keliya sida ay sameeyaan tijaabada digniinta sanadka (taaso waxa ay dhacdaa arbacad koobaad ee May duhurkii)



Habka dawanka digniinta waxa la isticmaali kara marka shil weyn ama masiibo dhacdo.

Digniinta habka dawanka waxa loo isticmaalikara gobol ahaan ama degmo ahan halkaas oo buliisku mid mid u isticmaali karaan dawanada goobaha looga baahanyahay.

Dawanada habeen walba waa la tijaabiyaa (iyaga oo aanu cod laheyn.)

Waxa aad sameyneyso?

Marka codka dawanka aad maqashu gudaha gal, albaabada oo dhan xidh habka dabeysha guriga soo geleysa fur, dhegeyso DR ama TV2.

Waxa haboonba inaad hubiso dhamaan dadka kaa ag dhawi iney fahmeen seenyaalaha digniinta.

Waxa kale oo haboon in cidii ku ag joogtaa ay waxa dhacaya fahmaan. DR iyo TV2 ayaa dadka war gelinaya oo u sheegaya xaaladda iyo dadka waxa laga rabo iney qabtaan. Fariimahaasu waa qaar ka imanaya buliiska ama maamulada.

DR iyo TV2 waxa ay warka loo baahanyahey ku bixin doonaan telex.

DR: eeg bogaga 597 iyo 598
TV2: eeg boga 893 iyo 894

Seenyaalaha

Dawanadu waxa ay bixindoonacod digniinta kharata ah.

Digniintu waxa ay ka koobantahey cod kor u kacaya dhakhso oo tartiibna hoos ugu degaya. Codkaasu waxa uu soconayaa ilaa 45 ilbidhiqsi.

Habka digniinta waxa loo sawiraa sedan:



Habka digniinta dawanka waa la isticmaalikaraa marka khatarta la dhafo. Habka digniintu waxa uu bixindoonaa cod kii hora ka duwan in khatartii ay dhamaatey.

Habka codkani waa waa mid dheer oo isku mid ah oo qaadanaya 45 ilbidhiqsi

Maka dawankani uu istaago debedda waad u bixi kartaa

Habka dhamaadka seenyaalaha khatarta sidan ayaa loo sawiraa.



Akhri dheerad ah oo digniinta ah
www.brs.dk/varsling